**SUMMAD: XGG/433/2025** **13/12/2025**

**Ku: Agaasimaha Golaha Wasiirradda** **Muqdisho**
**Ku: Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo: Talo Sharci**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tixraacaya Warqadda SUMMAD: **WCAD/XAWSHH/2683/2025** ee ku taariikheysan **01/12/2025,** Xafiiskana la keenay taariikhdu markay ahayd **06/12/2025** kana soo baxday **Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka,** Ujeeddadeeduna ahayd: **Soo-Gudbin Hindise-sharciyeedka La-dagaallanka Tahriibinta iyo Ka-ganacsiga Dadka.**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si Waafaqsan **Xeer Lr. 18 ee 29 Jannaayo 1976**, ayaa waxa uu halkaan idin kugu soo gudbinayaa Hindise-sharciyeedka sare ku xusan oo ay Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka horay ugu soo gudbisay Xafiiska, si uu uga guto waajibaadkiisa shaqo, ugana bixiyo Talo Sharci.

Xafiiska Garyaqaanka Guud, kadib markii uu darsay nuqullada Warqadda Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Dastuurka iyo Hindise-sharciyeedka sare ku xusan, kaas oo abuuraya qorshe iyo nidaam wax looga qabanayo dembiyada la xiriira tahriibinta muhaajiriinta iyo ka-ganacsiga dadka, waxaa uu Hindise-sharciyeedkan ku sameeyey sixitaan iyo toosin aan looga maarmin wuxuuna ka saaray Qodob loo arkey in aan loo baahneyn kadib marka uu la tashaday Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Dastuurka.

Sidaa darteed, Xafiiska Garyaqaanka Guud oo gudanaya waajibaadka ku xusan **Xeer L. 18 ee soo baxay 29 Jannaay 1976**, waxa uu ku talinyaa in loo gudbiyo Golaha Wasiirrada Hindise-sharciyeedkan ku lifaaqan warqaddan maadaama aanu ka hor-imaanayn Dastuurka iyo Shuruucda kale ee Dalka, si ay Golahu uu meel mariyaan loona gudbiyo Golaha

Shacabka Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya ka dib marka la dhammeystiro habraaca uu tilmaamayo **Xeer Ra'iisul-wasaare Lr. 125 ee soo baxay 06/04/2023.**

Ugu dambayn Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda waxa uu ku wargalinayaa Agaasimaha Golaha Wasiiradda iyo Wasaaradda Cadaaladda in nuqulka ku lifaaqan Warqadan uu yahay nuqulka kama dambayska ah ee Hindise-sharciyeedka La-dagaallanka Tahriibinta iyo Ka-ganacsiga Dadka ee la horgeeynaayo Golaha Wassiradda Xukuumadda JFS.

**Wabillahi Towfiiq**

**FG.** Halkan waxa ku Lifaaqan Warqada Wasaaradda iyo Nuqullada Hindise-sharciyeedka sare ku xusan.

**Adv. Xasan Axmed Caamir**
**Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
Xafiiska Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة العدل والشؤون الدستورية
مكتب مدير قسم التشريعات والا تفاقيات

Federal Republic of Somalia
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
Office of Director Legislations and Agreements Department

**SUMMAD: WCAD/XAWSHH/2683/2025** **Tr. 01/12/2025**

Mudane Garyaqaan,

**UJEEDDO: SOO-GUDBIN "HINDISE-SHARCIYEEDKA LA-DAGAALLANKA TAHIRIIBINTA IYO KA-GANACSIGA DADKA"**

Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxa ay halkan ku soo gudbinaysaa "Hindise-sharciyeedka La-dagaallanka Tahiriibinta iyo Ka-ganacsiga Dadka" oo abuuraya hannaan sharci iyo mid maamul oo lagula dagaallamayo dembiyada tahriibinta iyo ka-ganacsiga dadka.

Hindise-sharciyeedkan waxa uu qeyb ka yahay qorshaha Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee 2025 iyo sidoo kale hawlaha hortabinta u leh Xukuumadda Danqaran ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa in uu ka guto waajibkiisa sharci ee ku aaddan hindise-sharciyeedyada si habraaca ansixintu u dhammeystirmo.

Wada-shaqeyn wacan.

Mudane Xasan Axmed Cali
**Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,**
**Wasaaradda Caddaaladda iyo Arramiha Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
=Muqdisho=

Address: Martine Hospital Road, Mogadishu – Somalia.
Email: legislative@moj.gov.so
Tell: 0615847146

Dr. Caamir
06/12/2025

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID
Taariikh 06/12/2025

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## WASAARADDA CADDAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA

# HINDISE-SHARCIYEEDKA LA-DAGAALLANKA TAHIRIIBINTA IYO KA-GANACSIGA DADKA

Waxaa diyaariyay Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, 2025

# TUSMO

TUSMO ..... 1

CUTUBKA KOWAAD: QODOBBO GUUD ..... 4

Qodobka 1aad: Magaca ..... 4

Qodobka 2aad: Qeexid ..... 4

Qodobka 3aad: Ujeeddada Sharciga ..... 7

Qodobka 4aad: Baaxadda Sharciga ..... 7

CUTUBKA LABAAD: TAHRIIBINTA MUHAAJIRIINTA, KA-GANACSIGA DADKA IYO DEMBIYADA LA XIRIIRA ..... 7

Qodobka 5aad: Qaababka Ka-ganacsiga Dadka ..... 7

Qodobka 6aad: Ka-ganacsiga Carruurta ..... 9

Qodobka 7aad: Gacan-siinta Ka-ganacsiga Dadka ..... 10

Qodobka 8aad: Qaadashada Dokumentiyo Safar oo Been-abuur ah ..... 10

Qodobka 9aad: Fududeynta Gelidda ama Ka-baxidda Dalka ..... 11

Qodobka 10aad: Faro-gelinta Dokumenti dawladeed ..... 11

Qodobka 11aad: Ka-ganacsiga Dadka ee Dembiyada Abaabulan ..... 11

CUTUBKA SADDEXAAD: BAXNAANINTA DHIBBANEYAASHA IYO MAXKAMADEYNTA DEMBIILEYAASHA ..... 12

Qodobka 12aad: Qarinta Sirta Dhibbanaha ..... 12

Qodobka 13aad: Saameynta Qoraalka Dhibbanaha ..... 12

Qodobka 14aad: Magdhaw ..... 13

Qodobka 15aad: Ciqaab-la'aanta Dhibbaneyaasha Ka-ganacsiga Dadka ..... 13

Qodobka 16aad: Taageeridda iyo Ilaalinta Dhibbaneyaasha Ka-ganacsiga Dadka ..... 13

Qodobka 17aad: La -wareegid iyo Xayiraad Faa'iido laga Helay Fal-dembiyeed ..... 14

Qodobka 18aad: Dib-u-celinta Dhibbaneyaasha Ka-ganacsiga Dadka ..... 15

CUTUBKA AFARAAD: TAHRIIBINTA DADKA ..... 16

Qodobka 19aad: Tahriibin Qof ........ 16

Qodobka 20aad: Ka-faa'iidaysi Awoodeed ee Ujeeddo Tahriibin ........ 16

Qodobka 21aad: Fududeyn Tahriibin ........ 16

Qodobka 22aad: Dayacaad Sabab Tahriibin ........ 16

Qodobka 23aad: Ciqaabta Dhibbanaha Tahriibinta ........ 17

Qodobka 24aad: Koox Dembiyeed Abaabulan ee Tahriibin ........ 17

Qodobka 25aad: Faragelin Dokumenti Dawladeed Ujeeddo Tahriibin ........ 17

CUTUBKA SHANAAD: GUDDIGA LA-DAGAALLANKA TAHRIIBINTA IYO KA-GANACSIGA DADKA ........ 17

Qodobka 26aad: Asaasidda Guddiga ........ 17

Qodobka 27aad: Hawlaha Guddiga ........ 18

Qodobka 28aad: Warbixinta Guddiga ........ 19

CUTUBKA LIXAAD: TAAKULAYNTA QARAN D EE HIBBANEYAASHA TAHRIIBINTA IYO KA-GANACSIGA DADKA ........ 19

Qodobka 29aad: Asaasidda Sanduuqa Kaalmada ........ 19

Qodobka 30aad: Ilaha Dhaqaale ee Sanduuqa Kaalmada ........ 19

Qodobka 31aad: Lacagaha Laga Helo Sanduuqa ........ 19

Qodobka 32aad: Hawlwadeennada Sanduuqa ........ 20

CUTUBKA TODOBAAD: QODOBBO QUBANE AH ........ 20

Qodobka 33aad: Awood Garsoor ee ka Baxsan Xuduud-dhuleedka iyo Iskaashi Caalamiga ah ........ 20

Qodobka 34aad: Ciqaabaha kale ........ 20

Qodobka 35aad: Qarin Dembi ........ 21

Qodobka 36aad: Sababaha Cusleeya Ciqaabta ........ 21

Qodobka 37aad: Dembiyada Qofka aan Dabiiciga ahayn (corporate) ........ 21

Qodobka 38aad: Shirkadaha Gaadiidka iyo Milkiileyaashooada ........ 22

Qodobka 39aad: (Ka-joogsi dembi) iyo Soo-gudbin Xog Dembiileyaal ........ 22

Qodobka 40aad: Ikhtisaaska Dembiyada ka Dhaca Dibadda ........ 23
Qodobka 41aad: Muddo-dhaafka Dembiyada Sharcigan ........ 23
Qodobka 42aad: Fasiraad Sharci ........ 23
Qodobka 43aad: Xeer-nidaamiyeyaal ........ 24
Qodobka 44aad: Baabi'in ........ 24
Qodobka 45aad: Dhaqangal ........ 24

# CUTUBKA KOWAAD: QODOBBO GUUD

## Qodobka 1aad: Magaca

Sharcigan waxaa lagu magacabaa "***Sharciga La-dagaallanka Tahriibinta iyo Ka-ganacsiga Dadka***".

## Qodobka 2aad: Qeexid

Sharcigan gudihiisa, haddii aan si kale loogu qeexin, erayada soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa micnaha ku hor qoran:

(1) **"Ka-ganacsiga Dadka"** waxaa loola jeedaa ku-qancin, safrin, gudbin, hoy-siin ama guddoomid dad, loo adegsanayo hab cabsi-gelin ama isticmaalid awood ama qaababka kale ee qasbidda, af-duubka, khiyaanada, hoos-gelinta kaga faa'idaysi awoodeed, ka-faa'idaysi xaaladdiisa nuglaansho, siin ama ka guddoomid hanti ama faa'iidooyin si loogu guuleysto oggolaanshaha qof awood maamul ku leh qof kale, iyadoo ujeeddadu tahay in qofkaas laga faa'iideysto (la dhiigmiirto).

(2) **"Tahriibta Muhaajiriinta"** waxaa loola jeedaa isku-dubaridka ama gacan-ka-siinta qof in uu si sharci-darro ah ku galo dal uusan u dhalan ama uusan ku lahayn deganaansho rasmi ah si looga helo dhaqaale ama faa'iidooyin kale oo maaddi ah si toos ah ama si dadban, isagoo u maraya dhulka, badda ama cirka.

(3) **"Dhiig-miirad/ka-faa'iidaysi"** waxaa ka mid ah:

a) In qof lagu hayo xaalad addoonsi.
b) In qof lagu sameeyo dhaqamo la mid ah addoonsiga.
c) Adeegsi qasabka ah.
d) Si qasab ama dhagar ah oo qof loogu isticmaalo in laga saaro xubnaha jirkiisa.
e) In si qasab, jirdil ama dhagar ah lagu hawl-geliyo qof si uu uga qeyb-qaato iska hor-imaad hubaysan.
f) Ku-shaqeysi ama adeegyo qasab ah.
g) Ku-shaqeysi carruur.
h) U-adeegsi dhiig-miirasho jinsiyeed.
i) Guur carruureed.

j) Guur qasab ah.
k) U-adeegsi dawarsi.
l) Ku-tijaabin dawo.
m) U-shaqaaleysiin qof ka-qeyb-qaadasho gelid fal argagixiso.
n) Ku-boorin ka-qeyb-qaadasho gelid fal-dembiyeed kasta.

(4) **"Dhibbane"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo waxyeello loo geysto, la dhaawaco ama la dilo.

(5) **"Ku-xad-gudubka Dadka Nugul"** waxaa loola jeedaa ka-faa'idaysiga waalidnimada, mas'uulka, xirfadlaha ama mudnaanta kale ama awoodda loo adeegsado dadka nugul ama itaalka darran.

(6) **"Carruur"** waxaa loola jeedaa sida ku qeexatan Qodobka 29aad ee Dastuurka.

(7) "**Qasbid"** waxaa loola jeedaa adeegsiga awood ama ku cabsigelin awood, iyo qaababka kale ee aan gacan-ka-hadalka ahayn ama adeegsiga awood nafsiyeed ama ku hanjabiddeeda;

(8) "**Shaqo qasab ah**" waxaa loola jeedaa shaqo kasta ama adeeg kasta oo lagu soo rogo ama la saaro qof si xoog ah oo ay weliba wehliso hanjabaad.

(9) "**Koox dembiileyaal abaabulan ah ama shirkad dembiile ah"** waxaa loola jeedaa Koox ka kooban ugu yaraan 3 (saddex) qof ama in ka badan oo ku lug leh abaabul si loo geysto hal ama in ka badan oo dembiyo ah ama dembiyo culus, sida ku xusan Sharcigan, si toos ah ama si aan toos ahayn, iyadoo looga gol-leeyahay helitaanka faa'iido dhaqaale ama mid kale.

(10) **"Oggolaansho"** waxaa loola jeedaa in qof u aqbalo si rabitaankiisa ah qorshe ku aaddan tahriibin, isagoo xorriyad iyo awood u leh in uu sameeyo rabitaankaas.

(11) **"Faa'iido dembi"** waxaa loola jeedaa hanti kasta oo raad ku leh ama lagu helay gelitaan fal-dembiyeed, si toos ah ama si dadban, si waafaqsan Sharcigan.

(12) “Gaadiid Ganacsi” waxaa loola jeedaa qof dabiici ah ama aan dabiici ahay (corporate) ee ku lug leh gaadiidka qaada badeecadaha ama dadka si ay uga helaan faa’iido ganacsi;

(13) **“Baahin”** waxaa loola jeedaa in qof xayeysiiyo, bandhigo, faafiyo ama qeybiyo macluumaad hab kasta ha loo adeegsado, iyadoo ay ku jiraan isticmaalka mareegaha internet-ka iyo isgaarsiinta kale ee elektaroonigga ah, si ay macluumaadkaas u helaan dadweynaha ama qeyb ka mid ah.

(14) **“Addoonsi”** waxaa loola jeedaa xaaladaha qof uu qabanayo hawl si qasab ah isagoo laga qaadayo xuquuqdiisa shakhsiyeed iyo xoriyadiisa.

(15) **"Wasiir"** waxaa loola jeedaa Wasiirka u xilsaaran Arrimaha Caddaaladda, Xukuumadda JFS.

(16) **"Guddi"** waxaa loola jeedaa Guddiga La-dagaallanka Tahriibinta iyo Ka-ganacsiga Dadka ee ku xusan Qodobka 27aad ee Sharcigan.

(17) **"Sanduuq"** waxaa loola jeedaa Sanduuqa Qaran ee loogu talagalay taakuleynta dadka dhibbaneyaasha u ah ka-ganacsiga iyo tahriibinta ee lagu asaasay Qodobka 24aad ee Sharcigan.

(18) “**JFS**” waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**.**

(19) Eray sharciyeedka aan halkan lagu qeexin waxaa loo fasirayaa si waafaqsan sharciyada kale ee dalka iyo heshiisyada caalamiga ah ee ay Soomaaliya qeybta ka tahay.

### Qodobka 3aad: Ujeeddada Sharciga

1. In la abuuro qorshe iyo nidaam wax looga qabanayo dembiyada la xiriira tahriibinta muhaajiriinta iyo ka-ganacsiga dadka.
2. In la sameeyo wacyi-gelin bulsheed oo ku saabsan dhibaatooyinka ay bulshada ku hayaan dembiyada tahriibinta muhaajiriinta iyo ka-ganacsiga dadka.
3. In la xoojiyo iskaashiga garsoorka caalamiga ah ee la xiriira ka-hortagga tahriibinta muhaajiriinta iyo ka-ganacsiga dadka.
4. Daryeelidda, taageeridda iyo gacan-siinta dhibbaneyaasha tahriibinta iyo ka-ganacsiga Dadka.
5. Eedeynta iyo maxkamadeynta tahriibiyeyaasha muhaajiriinta iyo ka-ganacsadeyaasha dadka.

### Qodobka 4aad: Baaxadda Sharciga

Sharcigani waxaa lagu dabbaqayaa dhammaan noocyada tahriibinta muhaajiriinta iyo qaababka ka-ganacsiga dadka ee ka dhaca waddanka gudihiisa ama xuduudda tillaaba ha ahaadaan kuwo la xiriira dembi abaabulan ama mid aan la xiriirin.

## CUTUBKA LABAAD: TAHRIIBINTA MUHAAJIRIINTA, KA-GANACSIGA DADKA IYO DEMBIYADA LA XIRIIRA

### Qodobka 5aad: Qaababka Ka-ganacsiga Dadka

1. Qofku wuxuu gelayaa dembiga ka-ganacsi dad marka uu si ula-kac ah u qalqaaliyo, safriyo, gudbiyo, dejiyo ama guddoomo qof kale iyadoo ujeeddadiisu tahay uga faa’idaysi duruuf, isagoo u maraya arrintaas hababka kala duwan ee soo socda:
   a) Cabsi-gelin ama xoog-sheegad ama noocyo kale oo qasbid ah;
   b) Af-duubid;
   c) Qish (Fraud);
   d) Khiyaano (Deception);
   e) Ku-takri-fal awoodeed ama ka-faa’iidaysi nuglaansho;
   f) Ku-dhiirri-gelin, siin dhaqaale ama faa’iido kale si oggolaansho looga helo dhibane ka-ganacsi dad; ama
   g) Siin ama ka guddoomid dhaqaale ama faa’iido si loo kasbado oggolaanshaha qof awood maamul ku leh qofka kale.

2. Oggolaanshaha dhibbanaha ka-ganacsi dad ee lagu helay mid ama ka badan hababka ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, ma noqonayo mid la tixgeliyo.

3. Waxaa loo tixgelinayaa Ka-ganacsi Dad arrimaha ay ka mid yihiin qalqaalin, safrin, gudbin, dejin ama guddoomid carruur marba haddii ay ujeeddadu tahay uga faa'idaysi duruuf, xitaa haddii aysan ku jirin mid ka mid ah hababka lagu qeexay faqradda (1) ee qodobkan.

4. Dembiga ka-ganacsi dad waxaa lagu geli karaa gudaha xudduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama goob ka baxsan geyiga dalka.

5. Qof kasta oo qof kale ka ganacsada si uu uga faa'idaysto wuxuu gelayaa fal-dembiyeed uu ku mutaysanayo xabsi u dhexeeaya 20 - 25 (labaatan ilaa labaatan iyo shan) sano iyo ganaax lacageed oo aan ka yareyn $7,000 - 15,000 (todobo ilaa shan iyo toban) kun oo doollarka Mareykanka ah ama Shilin Soomaali u dhigma, haddii ku-talo-galka dembigu gaarsiisan yahay heer in dhibbanaha lagala baxo xubnaha jirkiisa waxay ciqaabtu noqonaysaa xabsi daa'im.

6. Qof kasta oo maal-geliya, gacanta ku haya, gargaara, fududeeya, gacan-siiya ama dhiirri-geliya fal-dembiyeedka ka-ganacsiga dadka si waafaqsan faqradaha (1) ee qodobkan waxaa lagu ciqaabayaa xabsi gaaraya 7– 15 (todobo ilaa shan iyo toban) sano iyo ganaax lacageed oo gaaraya $5,000 – $10,000 (shan kun ilaa toban kun oo doollarka Mareykanka ah ama Shilin Soomaali u dhigma ama labadaba.

7. Qof kasta oo uga faa'idaysta xil waalidnimo, mas'uulnimo, xirfad ama mudnaan kale, si uu u isticmaalo xakamaynta jireed ama maskaxeed ee qof kale, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi muddo aan ka yareyn 5 (shan) sano iyo ganaax lacageed oo aan ka yareyn $7,000 (todobo kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shilin Soomaali u dhigma, ama labadaba.

8. Qof kasta oo isticmaala **adeeg uu bixiyay qof dhibbane u ah ka-faa'idaysi** (dhiig-miirasho) sida ku qeexan Sharcigan isagoo og in adeeg-bixiyuhu yahay dhibbane ka-ganacsi dad, wuxuu gelayaa fal-dembiyeed uu ku muteysanayo ciqaab xabsi muddo aan ka yareyn 1 (hal) sano ama ganaax u dhexeeya $500 - 2,000 (shan boqol ilaa labo kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shilin Soomaali u dhigma, ama labadaba.

9. Qofka aan dabiiciga ahayn ee leh shakhsiyad qaanuuneed (shirkad) ama hay'ad kasta haddii wakiilladooda, maareeyeyaashooda ama wakaaladahooda ay ku galaan

magacyadooda dembiyo ka-ganacsiga dadka ee uu Sharcigani tilmaamayo, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo u dhexeeya $20,000 - 50,000 (laabatan ilaa kontan kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shilin Soomaali u dhigma, iyadoo aan waxba loo dhimayn mas'uuliyad-ciqaabeedka qofka dabiiciga ah. Waxaa intaas dheer, in Maxkamadda awoodda u lehi ay amri karto in la kala diro, rukhsadda lagala noqodo ama la xiro shirkadda/hay'adda lagu helo dembi ka-ganacsi dad si waafaqsan axkaamta Sharcigan.

10. Qofka lagu xukumay dembi ka-ganacsi dad waxaa lagu ciqaabayaa xabsi daa'in, haddii marka uu gelayay demibiga uu dhibbanuhu soo gaartay:

   a) Waxyeello jireed oo joogta ah ama halis gelinaysa naftiisa; iyo

   b) Dhimasho ama xaalad kasta keeni karta dhimasho la hubo.

## Qodobka 6[aad]: Ka-ganacsiga Carruurta

1. Qofku wuxuu gelayaa dembi haddii si waafaqsan ujeeddo ka-ganacsi dad uu u:

   a) Kafaalad-qaado carruur ama suuqgeeya (offer) kafaalad-qaad carruur; ama

   b) Soo bandhiga qof carruur ah inuu helo mas'uul sharci ama u soo bandhiga (offer) qof inuu mas'uul sharci ka noqdo qof carruur ah.

2. Qofka bilaaba ama isku daya kafaalo ama ka-wakiil-noqosho sharci ee Carruur sifo aan sharciga Dalka Waafaqsaneyn, Ujeeddadiisuna tahay ka faa'idaysi si waafaqsan faqradda (1) ee qodobkan wuxuu gelayaa fal-dembiyeedka ka ganacsi dad ee ku tilmaaman axkaamta Sharcigan.

3. Qofka bixiya, si ku talo-gal ah, macluumaad been-abuur ah, aan sax ahayn, aan dhammeystirneyn ama marin-habaabin ah si waafaqsan faqradda (1) ee qodobkan, wuxuu gelayaa fal-dembiyeedka ka-ganacsi dad ee ku qeexan axkaamta Sharcigan.

4. Qofka ku lug lahaada Ka-ganacsiga Dadka, isagoo qalqaalinaya, fududeynaya, dhiirrri-gelinaya ama dacaayad u sameynaya si kasta ha ahaatee, shaqaaleysiinta carruurta sida askareynta ama ka mid-noqoshada dagaallameyaal hubaysan ama ku-taageeridda kooxaha hubeysan ama ujeeddo guur ama u-adeegidda dagaallameyaasha hubeysan ama qaab kasta oo kale oo carruur yar loo isticmaalo

ama hawl kasta oo la xiiriirta qaababkan, wuxuu gelayaa fal-dembiyeedka ka-ganacsi dad ee ku qeexan axkaamta Sharcigan.

5. Qof kasta oo geysta fal-dembiyeedyada ku qeexan faqradaha qodobkan, wuxuu muteysanayaa xabsi u dhexeeya 10 - 20 (toban ilaa labaatan) sano ama ganaax lacageed oo u dhexeeya $20,000 – 50,000 (labaatan ilaa kontan kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shilin Soomaali u dhigma, ama labadaba.

6. Si gaar ah qofka carruur u geysta fal ka-ganacsi dad isagoo ah falaha asalka ah, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi daa'in.

### Qodobka 7aad: Gacan-siinta Ka-ganacsiga Dadka

Wuxuu gelayaa dembi uu ku mutaysanayo xabsi 10 – 20 (toban ilaa labaatan) sano ah ama ganaax u dhexeeya $10,000 – 20,0000 (toban ilaal labaatan) kun oo doollarka Maraykanka ah ama lacag shilin Soomaali u dhiganta, Qof kasta oo:

a) Ogaansho u kireeya ama gacanta ku haya guri, dhismo ama xarumo kale ee oggolaada in loo adeegsado ujeeddo ka-ganacsi dad;
b) Daabaca, dhoofiya ama soo dejiya qalab ujeedkiisu yahay taageeridda ka-ganacsi dad;
c) Maamula, socodsiiya ama maalgeliya hay'ad shaqo-bixiye ah ujeeddo taageerid ka-ganacsi dad;
d) Hababka kale ee xoojiya ka-ganasiga dadka.

### Qodobka 8aad: Qaadashada Dokumentiyo Safar oo Been-abuur ah

1. Qof kasta oo si sharci-darro ah u faafiya ama fududeeya helitaanka dokumentiyada safarka ama si been-abuur ah ku hantiya dokumentiyo rasmi ah ee dawladeed, ujeeddadiisuna tahay ka-ganacsi dad, wuxuu mutaysanayaa ciqaabta ku tilmaaman Faqradda (3) ee qodobkan.
2. Qof kasta oo si ku talo-gal ah u bixiya macluumaad been ah, aan sax ahayn, aan dhammeystirnayn dokumintiyada ku qeexan Faqradda (1) ee qodobkan, si loo fududeeyo ka-ganacsi dad, wuxuu mutaysanayaa ciqaabta ku tilmaaman Faqradda (3) ee qodobkan.
3. Qof kasta oo gala dembiyada ku xusan Faqradaha (1) ama (2) ee qodobkan, wuxuu mutaysanayaa xabsi u dhexeeya 5 - 10 (saddex ilaa toban) sano ama ganaax u dhexeeya $10,000 -20,000 (toddobo ilaa toban) kun oo doollarka Mareykanka ah ama shilin Soomaali u dhigma, ama labadaba.

## Qodobka 9aad: Fududeynta Gelidda ama Ka-baxidda Dalka

Qof kasta (Sarkaalka Guud) oo fududeeya, taageera ama dhiirri-geliya ka-bixidda ama soo-gelidda  geyiga JFS, isagoo ka soo gelinaya gudaha garoomada diyaaradaha caalamiga ah ama kuwa gudaha ee maxalliga ah, xuduud-dhuleedka ama xuduudaha kale ee dalka laga soo geli karo, isagoo ujeeddadiisu tahay taageerid ama xoojin ka-ganacsi dad, wuxuu gelayaa fal-dembiyeed uu ku muteysanayo xabsi u dhexeeya 5 - 10 (shan ilaa toban) sano ama ganaax lacageed oo u dhexeeya $5,000 – 10,000 (shan ilaa toban) kun oo doollarka Mareykanka ah ama shilin Soomaali u dhigma, ama labadaba.

## Qodobka 10aad: Faro-gelinta Dokumenti dawladeed

1. Qof kasta oo gala dembiyada ku xusan faqradaha (2) ama (3) ee qodobkan, wuxuu muteysanayaa xabsi u dhexeeya 3 - 7 (saddex ilaa toddobo) sano ama ganaax lacageed oo u dhexeeya $5,000 – 10,000 (shan ilaa toban) kun oo doollarka Mareykanka ah ama shilin Soomaali u dhigma, ama labadaba.
2. Qof kasta oo la wareega, tirtira, qariya, beddela, baabi’iya, ama hab kasta oo kale ku farsameeya aqoonsiyo ama dokumentiyo safar ee qof kale si loo xoojiyo ka-ganacsi dad ama qofkaas kale ka reeba ka-baxidda dalka ama uu caddaalad u raadsado Hay’adaha ay khuseyso, wuxuu mutaysanayaa ciqaabta ku xusan faqradda (1) ee qodobkan
3. Qof kasta oo la wareegga, qariya, baabi’iya ama si kale u deegsada dokumenti shakhsiyeed oo qof kale uu leeyahay ama ku handada in uu sidaas sameenayo ama u diida qofkaas in uu ka baxo dalka ama uu caddaalad u raadsado Hay’adaha ay khuseyso, wuxuu mutaysanayaa ciqaabta ku xusan faqradda (1) ee qodobkan

## Qodobka 11aad: Ka-ganacsiga Dadka ee Dembiyada Abaabulan

Haddii ay ku caddaato marka lagu eedeeyo qofka si waafaqsan Sharcigan, in uu ku lug leeyahay fal-dembiyeed ka-ganacsi dad, iyadoo uu qeyb ka yahay hawlaha koox dembiileyaal abaabulan ama uu abaabulo ama si toos ah u amro shakhsiyaad si ay u galaan fal-dembiyeed iyagoo qeyb ka ah koox ku hawlan dembi abaabulan, wuxuu muteysanayaa ciqaab xabsi daa'in ah.

## CUTUBKA SADDEXAAD: BAXNAANINTA DHIBBANEYAASHA IYO MAXKAMADEYNTA DEMBIILEYAASHA

### Qodobka 12aad: Qarinta Sirta Dhibbanaha

1. Qof kasta oo ka tirsan hay'adaha garsoorka iyo hay'adaha sharci fulinta, ee ku hawlan baaris ama maxkamadeyn ka-ganacsi dad, waa inuu ilaaliyaa xaqa gaarka ah ee dhibbanaha ka-ganacsi dad iyo marqaatiyada.
2. Maxkamadda ku hawlan qaadista fal-dembiyeed ku xusan Sharcigan, ka dib markii ay tixgeliso dhammaan xaaladaha iyo danta ugu wanaagsan ee dhinacyada, waxay amri kartaa in kaamiro lagu duubo maxkamaddeynta.
3. Qof kasta oo shaaciya magaca iyo xaalada shakhsiyeed ee qof dhibbane u ah ka-ganacsiga dadka ama wixii macluumaad kale ah ee caddeynaya aqoonsiga dhibbanaha iyo xaaladaha ku xeeran dembiga, wuxuu galayaa dembi.
4. Haddii lagu duubo kamaro xilliga maxakamadaynta, qof kasta oo faafiya garmaqalka maxkamadeynta iyadoo aan laga haysan oggolaasho qoraal ah ee maxkamadeed, wuxuu galayaa dembi
5. Qof kasta oo gala dembiyada ku xusan qodobkan wuxuu mutaysanayaa xabsi u dhexeeya 1 - 5 (hal ilaa shan) sano, ama ganaax lacageed oo u dhexeeya $1,000 – 5,000 (kun ilaa shan) kun oo doollarka Mareykanka ah ama shilin Soomaali u dhigma, ama labadaba, haddii qofka galay dembigan uu yahay qof aan dabiici ahayn wuxuu muteysanayaa ganaax lacageed oo u dhexeeya $20,000 – 50,000 (labaatan ilaa konton) kun oo doollarka Mareykanka ah ama shilin Soomaali u dhigma, ama labadaba.

### Qodobka 13aad: Saameynta Qoraalka Dhibbanaha

Si waafaqsan habraacyada la xiriira maxkmadeynta dembiyada ku qeexayn sharcigan, Xeer-ilaalintu waa inay soo gudbisaa xaaladaha ku hareeraysan gelidda dembiga iyo saameynta dembigu ku yeeshay dhibbanaha dembiga ka-ganacsiga dadka:

a) Si loo caddeeyo in dembiga la galay, si waafaqsan Sharcigan-

   i. Uu ku dhacayo ama uu xiriirl la leeyahay qofka ay khuseyso; ama

   ii. Uu ku yimid xaaladaha qasabka ee ku xusan Qodobka 5aad ee Sharcigan; iyo

b) Iyadoo ujeeddadu ay tahay codsashada in ay maxkamaddu soo saarto ciqaab ku habboon, taasoo lagu qiimeeyay xadka iyo saameynta ballaaran ee waxyeelladu u geystay dhibbanaha dembiga ka-ganacsiga dadka.

### Qodobka 14[aad]: Magdhaw

Haddii qof lagu xukumo dembiyada ku xusan Sharcigan, Maxkamaddu markay ku xukunta ciqaabta Sharcigan lagu qeexay, waxay amri kartaa in dembiiluhu bixiyo Mag-dhaw u dhigma waxyeellada uu geystaty ama u celiyo xuquuqda uu ka haysto qofka dhibbanaha ah ee la xiriirta:

a) Kharashka daaweynta ama caafimaadka maskaxda;

b) Kharashka lagama-maarmaanka ah ee gaadiid-raaca, hoyga iyo kharashaadka kale ee nolosha; iyo

c) Wixii kale ee gargaar ah oo ay maxkamaddu tixgeliso.

### Qodobka 15[aad]: Ciqaab-la'aanta Dhibbaneyaasha Ka-ganacsiga Dadka

1. Iyada oo aan wax loo dhimayn axkaamta sharciyada kale, dhibbanaha ka-ganacsiga dadka laguma qaadi karo dembi la xiriira joogitaankiisa sharci-darrada ah ee Soomaaliya ama fal-dembiyeed kasta oo si toos ah uga dhashay ka-ganacsiga lagu sameeya.

2. Dhibbanaha Soomaaliga ah laguma qaadi karo dembi la xiriira falalka sharci-darrada ah ee ka dhashay dembiga ka-ganacsiga dadka.

3. Inta lagu guda jiro marxaladaha caddeynta, baarista iyo maxkamaddeynta dembiyada ka-ganacsiga dadka, waa in la sameeyo xaqiijin lagu ogaanayo dhibbanaha aqoonsiyadiisa, dhalashadiisa iyo da'diisa si loo hubiyo in laga saaray liiska dembiileyaasha. (iyadoo xogtiisa la ilaalinayo)

### Qodobka 16[aad]: Taageeridda iyo Ilaalinta Dhibbaneyaasha Ka-ganacsiga Dadka

1. Wasiirku, isagoo la tashanaya Guddiga, wuxuu dejinayaa qorsheyaal ku saabsan bixinta adeegyo ku habboon ee dhibbaneyaasha ka-ganacsiga dadka iyo carruurta wehlisa, kuwaasoo isugu jira:
   a) Ku-soo-laabasho iyo ka-bixitaan geyiga JFS;
   b) Dib-u-dejin;
   c) Dib-u-dhexgal;

d) Hoy ku habboon iyo baahiyahooda kale ee asaasiga ah;
e) Taageero nafsiyeed (psychosocial);
f) Gargaar caafimaad oo ku habboon;
g) Gargaar sharci ama macluumaad sharci, oo ay ku jiraan macluumaadka la xiriira hab-raaca garsoorka iyo maamul;
h) Kaalmo-sharciyeed, gaar ahaan xaqa ay u leeyihiin la-talin sharci; iyo
i) Gargaar kasta oo kale oo lagam-maarmaan u ah dhibbanaha.

2. Marka la sameynayo qorsheyaasha hoos yimaad faqradda (1) ee qodobkan, Wasiirku wuxuu tixgelinayaa dadka da'da ah, naafada, dumarka iyo carruurta ee ah dhibbaneyaal ka-ganacsi dad, iyadoo mar walba la dhawrayo xaaladaha gaarka ah ee dhibbane kasta.
3. Dhibbaneyaasha ka-ganacsiga dadka waxay ka shaqeyn karaan shaqo lagu kasbanayo dheef muddada ay joogaan geyiga JFS.
4. Iyadoo aan waxba loo dhimayn axkaamta sharci kale, dadka dhibbaneyaasha ka ka-ganacsi dad waxaa loo oggol yahay in ay joogaan JFS illaa ay ka dhammaanayaan habraacyada dacwadda, waxayna maxkamaddu amraysaa in loo keeno carruurtooda inta uu socdo hab-raaca dacwaddu.
5. Dhammaan macaamilka lala yeelanayo qofka dhibbanaha ah, sarkaal kasta oo ka tirsan dawladda oo la macaamila dhibbanaha ama qof kasta oo kale, waa in uu si xilkasnimo leh ula macaamilo dhibbanaha waana in la xaqiijiyo in dhammaan xiriirka loola yeeshay qofkaas si meel-mar ah, isla markaana lagula hadlay af uu fahmayo.
6. Adeegyada taageerada ah ee ku xusan qodobkan waxay dhibbaneyaasha ka-ganacsiga dadku u helayaan, iyagoo aan loo eegeyn jinsigooda, qawmiyaddooda, ama ka-mid-ahaanshooda koox bulsho gaar ah, qabiil ama jinsiyaddooda.
7. Qofka loo aqoonsaday in uu yahay dhibbane ka-ganacsi dad, waxaa laga dhaafayaa bixinta khidmadda dacwadda madaniga ah ee la xiriirta arrimaha falalka dacwadda dembiga ka-ganacsiga dadka.

### Qodobka 17aad: La -wareegid iyo Xayiraad Faa'iido laga Helay Fal-dembiyeed

1. Si waafaqsan ciqaabta lagu tilaamay Sharcigan ama Shuruucda kale ee dhaqan-galka ah, codsiga xeer-ilaalinta ka dib maxkamaddu waxay amraysaa la-wareegidda iyo xayiraadda dhammaan faa'iidada laga helay dembiga waxaana lagu shubayaa khasnadda Guud ee Dawladda JFS.

2. Si waafaqsan ciqaabta lagu tilaamay Sharcigan ama Shuruucda kale ee dhaqan-galka ah, maxkamaddu waxay amaraysaa la-waregidda iyo xayiraadda, hanti kasta oo guurto ama ma-guurto ah, oo loo isticmaalo fududeynta dembiga ka-ganacsiga dadka iyo hanti kasta oo lagu qabto iyadoo loo isticmaalayo xad-gudubkaas, dhammaan hantidaas waxaa lagu shubayaa khasnadda Guud ee Dawladda JFS.
3. Dhammaan mag-dhawyada waxyeellooyinka soo gaara dhibbanaha dembiga ka-ganacsiga dadka waxaa laga qaadayaa hantida gaarka ah ee qofka geystay dembiga, haddii hantidiisu ku filnaan weydo magdhawga, waa in hadhaaga laga bixiyaa Sanduuqa.
4. Haddii hantida laga helay dembiga la burburiyo, ama qiimaheeda hoos u dhac ku yimaaddo ama laga dhigo mid aan qiimo lahayn iyadoo ay ka dhalatay fal kasta ama ka-tegid sameyn fal ee qofka galay dambiga, si toos ah ama si aan toos ahayn ama la qariyo, la burburiyo, la beddelo ama la xawilo si looga hortago xayiraadda ama la-wareegidda faa'iidada laga helay dembiga, waxaa loogu darayaa dembiilaha ciqaab kale iyadoo lagu amrayo in uu bixiyo lacag u dhiganta qiimaha dheefta uu ka helay dembiga.
5. Hantida lagula wareego si waafaqsan sharcigan, waxaa loo maaraynaa hab waafaqsan sharciyada arrintaas la xiriira.

### Qodobka 18[aad]: Dib-u-celinta Dhibbaneyaasha Ka-ganacsiga Dadka

1. Iyadoo la eegayo qodobbada Sharcigan, Wasiirka u xilsaaran arrimaha la xiriira socdaalka ayaa mas'uul ka ah dib-u-celinta ku salaysan rabitaanka dhibbaneyaasha ka-ganacsiga dadka si ay ugu noqdaan wadamadooda asalka ah.
2. Wasiirka u xilsaaran arrimaha la xiriira socdaalka, waxaa kale oo uu mas'uul ka yahay soo-saaridda dokumentiyada safarka daruuriga ah ee loo baahan yahay si loo fududeeyo dib-u-ugu-soo–noqoshada geyiga JFS ee ku salaysan rabitaanka dhibbaneyaasha ka-ganacsiga dadka iyo muhaajiriinta loo tahriibay meel ka baxsan geyiga Soomaaliya, kuwaasoo ah muwaadiniin Soomaaliyeed.
3. Haddii uu Wasiirka u xilsaaran arrimaha la xiriira socdaalka u arko in waqtiga la joogo aysan ku habboonayn dib-u-celinta dhibbanayaasha ka-ganacsiga dadka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya jooga iyadoo laga baqayo in ay khatar soo gaarto dhibbanayaashaas, Wasiirku wuxuu u oggolaan karaa in dhibbanayaashaasi ku nagaadaan geyiga JFS ilaa muddada uu u arko in ay ku habboon tahay.

## CUTUBKA AFARAAD: TAHRIIBINTA DADKA

### Qodobka 19^aad^: Tahriibin Qof

1. Qof kasta oo si toos ah ama si aan toos ahayn u tahriibiya dad isagoo ku-talo-galkiisu yahay in uu ka helo dheef/dhaqaale ama faa'iido kale, isagoo dadka u kala gudbinaya xuduudaha caalamiga ah ama isku daya in uu ka gudbiyo ama u diyaariyo in ay si sharci-darro ah u galaan ama uga baxaan xudduudaha Qaranka JFS si aan waafaqsaneyn Xeerarka Socdaalka iyo Shuruucda kale ee dhaqan-galka ah, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi u dhexeeya 5 -- 10 (shan ilaa toban) sano ama ganaax lacageed oo dhan $7,000 – 15,000 (todobo ilaa toban iyo shan) kun oo Doollarka Mareykanka ah ama Shilin Soomaali u dhigma, ama labadaba.

### Qodobka 20^aad^: Ka-faa'iidaysi Awoodeed ee Ujeeddo Tahriibin

2. Qof kasta oo ka faa'idaysanaya xilkiisa waalidnimo, wakiilnimo sharci, xirfadlenimo mas'uuliyad dawladeed, saraakaalnimo hay'adaha sharci-fulinta, barenimo ama culumo-diineed, ama qaddarin kale ama leh awood ay ku ixtiraamaan dadka nugul, isagoo ka faa'idaysanaya xag maskax ama jireed ee qofka uu mas'uulka ka yahay, wuxuu muteysanayaa xabsi u dhexeeya 3 - 5 (saddex ilaa shan) sano ama ganaax lacageed oo gaaraya $5,000 – 7,000 ( shan ilaa todobo) kun oo doollarka Mareykanka ah ama shilin Soomaali u dhigma, ama labadaba.

### Qodobka 21^aad^: Fududeyn Tahriibin

Qof kasta oo si ogaal ah u fududeeya, kaalmeeya ama gacan ka geysta fal-dembiyeedka Tahriibinta Muhaajiriinta, si sharci darro uga baxaya ama soo gelaya JFS, wuxuu muteysanayaa, xabsi muddo u dhexaysa 5 - 7 (shan ilaa tobob) sano ama ganaax lacageed oo gaarayaa $4,000 – 7,000 (afar ilaa todobo) kun oo doollarka Mareykanka ah ama shilin Soomaali u dhigma.

### Qodobka 22^aad^: Dayacaad Sabab Tahriibin

3. Qof kasta oo si xil-gudasho-xumo ama dayacaad xil ah uga qeyb qaata fal-dembiyeedka Tahriibinta Muhaajiriinta, wuxuu muteysanayaa, ganaax lacageed oo dhan $3,000 (saddex kun) oo Doollarka Mareykanka ah iyo digniin kama-dambays ah. Haddii qofkaas mar labaad lagu helo isla dembigan wuxuu muteysanayaa xabsi u dhexeeya 2

- 3 (labo ilaa saddex) sano ama ganaax lacageed oo dhan $5,000 (shan kun) oo Doollarka Mareykanka ah iyo shaqo-ka-eryid haddii uu hayey xil dadweyne ama xil hay'ad gaar loo leeyahay.

### Qodobka 23aad: Ciqaabta Dhibbanaha Tahriibinta

La-tahriibiyaha dhibbanaha u ah fal tahriibin, laguma ciqaabi karo dembiga tahriibinta, waxaana loo aqoonsanayaa inay yihiin dhibbanayaal.

### Qodobka 24aad: Koox Dembiyeed Abaabulan ee Tahriibin

Qof kasta oo asaasa, maamula, ama xubin ka noqda koox dembiyeed abaabulan oo ay ujeeddadeedu tahay tahriibin dad, waxaa lagu ciqaabayaa 10 – 15 (toban ilaa toban iyo shan) sano.

### Qodobka 25aad: Faragelin Dokumenti Dawladeed Ujeeddo Tahriibin

Qof kasta oo beddela, tirtira, dhalan roga ana been abuura dokumenti safar ama mid shakhsi ujeeddo tahriibin qof, wuxuu gelayaa demiyada ku xusan Qodobka 12aad ee sharcigan waxuuna mutaysanayaa ciqaabta ku xusan.

## CUTUBKA SHANAAD: GUDDIGA LA-DAGAALLANKA TAHRIIBINTA IYO KA-GANACSIGA DADKA

### Qodobka 26aad: Asaasidda Guddiga

1. Sharcigan gudahiisa waxaa lagu asaasayaa Guddiga La-dagaallanka Tahriibinta iyo Ka-ganacsiga Dadka ee Heer Federaal.
2. Xubnaha Guddigan waxay ka kooban yihiin:
    a) Wasiirka Wasaaradda u xilsaaran Caddaaladda;
    b) Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda
    c) Wasiirka Wasaaradda u xilsaaran Duulista Hawada;
    d) Wasiirka Wasaaradda u xilsaaran Arrimaha Dibadda;
    e) Wasiirka Wasaaradda u xilsaaran Qoyska;
    f) Wasiirka Wasaaradda u xilsaaran Amniga Gudaha;
    g) Wasiirka Wasaaradda u xilsaaran Arrimaha Gudaha;
    h) Wasiirka Wasaaradda u xilsaaran Shaqada;

   i) Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka;
   j) Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed; iyo
   k) Guddoomiyaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuquuqul Insaanka.
3. Guddoomiyaha Guddigu wuxuu noqonayaa Xoghayaha Jootada ee Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka.
4. Guddigu wuxuu magacaabayaa guddi-hawleed ka kooban hay'adaha guddiga iyo xubnihii kale ee loo arkaa inay lagama maarmaan ah, guddi-hawleedkaas oo si joogta ah ula falgalaya dembiyada la xiriira sharcigan.

### Qodobka 27[aad]: Hawlaha Guddiga

1. Guddigu wuxuu Wasiirka kala talinayaa dhammaan hawlaha ay qabanayaan hay'adaha ka shaqeeya ka-hortagaga tahriibinta iyo ka-ganacsiga dadka, ilaalinta dhibbaneyaasha iyo horumarinta barnaamijyada taakulada.
2. Iyadoo la dhawrayo faqradda (1) ee qodobkan, Guddigu wuxuu Wasiirka talo ka siinayaa:
   a) Iskuduwidda siyaasado iyo barnaamijyo hagaya hay'adaha ku shaqada leh arrimahan si wax looga qabto dhibaatooyinka la xiriira tahriibinta iyo ka-ganacsiga dadka;
   b) Iskuduwidda wadaagidda macluumaadka ku saabsan demibyada ku qeexan Sharcigan;
   c) Dib-u-eegista sharciyada la xiriira Sharcigan, si loo ilaaliyo is waafaqida sharciyada la xiriira axkaamta sharcigan;
   d) Kormeeridda iyo qiimeynta horumarka ay JFS ka sameysay, iyadoo la tixgelinayo ka-hortagga, ilaalinta iyo maxkamadeynta la xiriira dembiyada sharcigan ku qeexan;
   e) Soo ururinta iyo diiwaangelinta xogta iyo macluumaadka ku saabsan dacwadaha la xiriira dembiyada sharcigan ku qeexan;
   f) Bixinta adeegyada la-talinta iyo hoysiinta ku-meel-gaarka ah ee dadka dhibbaneyaasha ah;
   g) Sameynta olole dadweyne oo ka dhan ah tahriibinta iyo ka-ganacsiga dadka, iyadoo loo marayo marinnada kala duwan ee warbaahinta; iyo
   h) Hawlaha kale ee lagama-maarmaanka u ah hirgelinta Sharcigan.

## Qodobka 28aad: Warbixinta Guddiga

Guddigu wuxuu warbixin-sanadeed u soo gudbinayaa Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Golaha Wasiirrada Xukuumadda JFS, warbixintaas oo ku saabsan siyaasadaha, barnaamijyada iyo hawlo kasta oo la xiriira hirgelinta Sharcigan.

### CUTUBKA LIXAAD: TAAKULAYNTA QARAN D EE HIBBANEYAASHA TAHRIIBINTA IYO KA-GANACSIGA DADKA

## Qodobka 29aad: Asaasidda Sanduuqa Kaalmada

1. Waxaa la asaasayaa Sanduuqa Kaalamada ee Dhibbanayaasha Ka-ganacsiga Dadka, kaasoo uu maamulayo Guddi Sare (Board of Trustees)
2. Sanduuqa waxaa loo adeegsanayaa kaalmeynta dadka dhibbanaha u ah dembiyada ka-ganacsiga dadka.

## Qodobka 30aad: Ilaha Dhaqaale ee Sanduuqa Kaalmada

1. Ilaha Dhaqaale ee Sanduuqa waxay noqonayaan:
   a) Miisaaniyad Sanadlaha ah ee ay u qoondayso Xukuumada JFS;
   b) Faa'iidooyinka laga helo dembiyada ee lagula wareego si waafaqsan qodobka 17aad ee Sharcigan.
   c) Dakhliga ka soo xarooda maalgashiga uu sameeyo Guddiga Sare ee Sanduuqa Kaalmada;
   d) Deeqaha Guddiga Sare ee Sanduuqa Kaalmada uu ka helo hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah ee u xilsaaran taakulaynta dhibbanayaasha ka-ganacsiga dadka; iyo
   e) Deeqaha ay Guddiga Kaalmeynta Sanduuqa ka helaan Shakhsiyaad Samefaleyaal ah, Shirkado Ganacsi iyo hantiileyaasha kheyrka jecel.
2. Hantida sanduuqa waxaa loo maaraynayaa hab waafaqsan sharciyada maaraynta maaliyadda guud ee dalka.

## Qodobka 31aad: Lacagaha Laga Helo Sanduuqa

Guddiga Sare ee Sanduuqa Kaalmada wuxuu ku bixin karaa lacagaha Sanduuqa:

a) Gargaarka loogu talagalay dadka dhibbaneyaasha ka-ganacsiga dadka si waafaqsan Qodobka 19aad ee Sharcigan; iyo
b) Talooyinka kale ee uu ku taliyo Guddiga Ka-hortagga Tahriibinta iyo Ka-ganacsiga Dadka.

## Qodobka 32aad: Hawlwadeennada Sanduuqa

1. Agaasimaha Guddiga iyo Hawlwaeennadiisa waxaa faahfaahinaya, xeernidaamiye u gaar ah oo ay Golaha Wasiirradu meelmariyaan.
2. Hawlwadeennada Sanduuqu, waxay hawshooda u gudanayaan si waafaqsan qodobbada sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa.

# CUTUBKA TODOBAAD: QODOBBO QUBANE AH

## Qodobka 33aad: Awood Garsoor ee ka Baxsan Xuduud-dhuleedka iyo Iskaashi Caalamiga ah

1. Muwaadin kasta oo Soomaali ah ama qof kasta oo si joogta ah u deggan dalka, oo ku gala fal-dembiyeedyada Sharcigan meel ka baxsan geyiga Soomaaliya, wuxuu muteysanayaa ciqaabta fal-dembiyeedkaas uu geystay ee ku xusan qodobbada Sharcigan.
2. Qofna looma ciqaabi karo dembiga ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, haddii qofkaasi lagu bariyeelay ama lagu xukumay dalka uu ku galay dembiga.

## Qodobka 34aad: Ciqaabaha kale

1. Haddii qof aan muwaadin ahayn ee lagu xukumay dembi si waafaqsan Sharcigan, waxaa laga masaafurinayaa dalka markuu dhammeysto xukunka, isagoo aan dib dambe ugu soo laaban karin geyiga JFS.
2. Shaqaale kasta ama sarkaal kasta oo ka tirsan hay'ad dawladda oo si ogaal ah u farsameeya ama soo saara warqadaha safarka ama dokumentiyada kale, kuna guul-darraysta in uu dhawro hab-raacyada iyo shuruudaha ku qeexan sharciga, iyadoo ujeeddadu tahay gelid dembi si waafaqsan Sharcigan, wuxuu gelayaa dembi uu ku muteysanayo xabsi u dhexeeya 1 - 5 (hal ilaa shan) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn $5,000 – 10,000 (shan ilaa toban) kun oo doollarka Mareykanka ah ama Shilin Soomaali u dhigma, ama labadaba.
3. Haddii dembiluhu kafaalo-qaado ama uu ku haysto ilmo mas'uuliyad sharci isagoo galay dembiyada ku xusan Sharcigan, Maxkamadda waxay kala noqonaysa kafaaladda ama mas’uuliyadda sharci ee ilmaha, waxaana lagu dabaqayaa arrinta carruurta si waafaqsan shuruucda dalka iyo Shareecada Islaamka.

## Qodobka 35[aad]: Qarin Dembi

1. Qof kasta oo si ulakac ah u qariya dembiile, walxo ama hanti ka dhalatay dembi lagu qeexay sharcigan ama u qariya ama u baabi'ya raadadka dembiga, wuxuu mutaysanayaa xabsi u dhexeeya 3 – 5 (saddex ilaa shan) sano ah.
2. Ciqaabta lagu qeexay faqradda (1) ee Qodobkan, laguma ciqaabaya haddii qofka qariyay uu yahay sayga/afada, faraca ama asalka dembiilaaha.

## Qodobka 36[aad]: Sababaha Cusleeya Ciqaabta

Garsooruhu wuxuu ciqaabta dembiyada sharcigan cuslayn karaa saddex meelood meel haddii ay jiraan xaaladaha soo socda:

1. Haddii dembiiluhu yahay qof ah asaase, maamule ama xubin ka tirsan koox dembiyeed abaabulan.
2. Haddii dembigu yahay mid ka gudbaya xuduudaha.
3. Haddii dembiileyaashu bataan ama dembiga uu geysto qof hub sita.
4. Haddii dembiiluhu yahay sarkaal dawladeed.
5. Haddii dembigu yahay mid halis gelinaya nafta qofka la tahriibinayo, caafimaadkiisa ama lagula dhaqmay habdhaqan ka baxsan bani'aadannimada.
6. Haddii dhibbanuhu yahay carruur, dumar, qof aan awood sharci lahayn, ama naafo.
7. Haddii dembiiluhu u adeegsado dembiga dokument safar ama shakhsi oo been abuur ah ama la dooriyay, ama uu adeegsaday dokument safar ama shakhsi ee qof kale leeyahay.
8. Haddii dembiga lagu galay markab ama doon si khilaafsan ujeeddadii loogu talagalay ama la marsiiyo waddo aan teedii ahayn.

## Qodobka 37[aad]: Dembiyada Qofka aan Dabiiciga ahayn (corporate)

1. Qofka ugu sarreey maamulka shirkad/hay'ad waxaa lagu ciqaabayaa ciqaabta demibga uu ku galo shaqaale ka tirsan shirkaddiisa magaca iyo danaha shirkaddaas haddii guddoomiyuhu arrintaas ogaa, dembigana u ku dhacay ka-gaabis uu ka gaabiyay waajibaadkiisii shaqo.
2. Qofka aan dabiiciga ahayn (shirkad/hay'ad) wuxuu mas'uul kala yahay bixinta ganaaxa ama magdhawga lagu xukumo shaqaalihiisa dembiga ku geystay magaca iyo danaha shirkadda.

3. Maxkmaddu waxay joojin kartaa muddo hal sano ah hawlaha qofka aan dabiiciga ahayn (shirkadda).
4. Maxkamaddu way kala diraysaa ama shatiga kala noqonaysaa qofka aan dabiiciga ahayn (shirkadda) haddii shaqaalihiisu ay magiciisa iyo danihiisa mar kale ku galaan dembi.

### Qodobka 38[aad]: Shirkadaha Gaadiidka iyo Milkiileyaashooada

1. Shirkadaha ama milkileyaasha gaadiidka dhulka, badda iyo cirka waxaa xil daryeel (duty of care) uu ka saaran yahay xaqiijinta in dhammaan rakaabku haysto dokumentiyo sax ah ee lagu soo geli karo ama looga dhoofi karo dalka JFS, si waafaqsan xeerarka socdaalka iyo xeerarka kale ee dhaqan-galka.
2. Milkiilaha gaadiidka ee jabiya faqradda (1) ee qodobkan waxaa lagu ciqaabayaa ganaaxyada soo socda:
   a) Gaadiidka dhulka ganaax dhexeeya $500 – 2,000 (shan boqol ilaa labo) kun oo doollarka Maraykanka ah ama shiling Soomaali u dhigma.
   b) Gaadiidka Badda ganaax dhexeeya $3000 – 5,000 (saddex ilaa shan) kun oo doollarka Maraykanka ah ama shiling Soomaali u dhigma.
   c) Gaadiidbka Cirka ganaax u dhexeeya $5000 – 10,000 (shan ilaa toban) kun oo doollarka Maraykanka ah ama shiling Soomaali u dhigma.
3. Iyada oo aan waxba loo dhimayn xuquuqda dadka si niyad sami leh ula tacmaalay, waxaa lala wareegayaa gaadiidka, lacagta, badeecadaha iyo dhammaan hantida ka dhalatay dembiga.
4. Gaadiidka lala wareegay, waxaa lagu wareejin karaa hay'adda fulinta sharciga ee soo qabatay, marka la ogaado inuu hawlgeli karo.

### Qodobka 39[aad]: (Ka-joogsi dembi) iyo Soo-gudbin Xog Dembiileyaal

1. Haddii mid ka mid ah dembiilayaasha uu hay'adaha awoodda u leh u soo gudbiyo xogta dembiyada lagu qeexay Sharcigan iyo dembiilayaasha ku lugta leh ka hor inta aysan ogaan hay'adahaasi, maxkamaddu waxay ka cafinaysaa ciqaabta haddii warbixintiisu ay keento in la soo qabto dembiilayaasha kale iyo hantida ka dhalatay dembigaas.
2. Haddii warbixinta lagu sheegay faqradda (1) ee qodobkan uu hay'adaha awoodda u leh u sheego ka dib markii ay ogaadeen dhicitaanka demibga, ayna

warbixintaasi ay keento in la soo qabto dembiilayaasha kale, maxkmaddu waxay ka cafinaysaa qofkaas ciqaabta asalka ah ee dembigaas.

3. Lama dabbaqayo axkaamta faqradda (1) iyo (2) ee qodobkan, haddii dembiga uu usababo la-tahriibiyaha dhimasho, cudur aan laga bogsoonayna ama naafanimo joogto ah.

**Qodobka 40aad: Ikhtisaaska Dembiyada ka Dhaca Dibadda**

Iyada oo aan waxba loo dhiimayn sharciyada kale arrintan la xiriira, qodobbada sharcigan ayaa lagu dabbaqayaa dembiyada ka dhaca meel ka baxsan geyiga JFS isla markaasna falkaasi uu dembi ka yahay dalka uu ka dhacay si waafaqsan sharciyadiisa gudaha ah ama heshiisyo caalami ah oo uu qeyb ka yahay dalkaasi, haddii ay jiraan xaaladaha soo socda:

a) Marka qofka la tahriibiyay uu yahay muwaadin Soomaaliyeed;
b) Marka dembiga laga abaabulay, maalgeliyay, lagu diyaariyay, lagu kormeeray gudaha JFS;
c) Marka dembiga ay geysato koox dembiileyaal abaabulan oo ka hawlgala in ka badan hal waddan oo ay Soomaaliya ku jirto.
d) Marka dembigu uu dhibaato gaarsiinayo muwaadin Soomaaliyeed, qof si joogto ah u deggan dalka, amniga iyo danaha qaranka; ama
e) Marka dembiiluhu yimaaddo dalka isla markaana aan dalkii uu dembiga ku galay loo dhiibin.

**Qodobka 41aad: Muddo-dhaafka Dembiyada Sharcigan**

Dembiyada tahriibinta iyo ka-ganacsiga dadka ee lagu qeexay Sharcigan waxaa loo tixgelinayaa in ay yihiin dembiyo ka dhan ah xuquuqda aadanaha oo aan ku dhacaynin muddo dhaaf.

**Qodobka 42aad: Fasiraad Sharci**

Sharcigan waa in loo fasiraa si waafaqsan mabaadi'da sharciga caalamiga ah, mana jiro wax sharcigan ka mid ah oo loo fasiran karo in uu ilaalinayo wax ka yar kan ku xusan shuruucda kale ee Dalka ama kuwa caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha ee khuseeya dhaqan-gelinta Sharcigan.

## Qodobka 43aad: Xeer-nidaamiyeyaal

Wasiirku wuxuu awood u leeyahay in uu soo saaro Xeer-nidaamiyeyaal, Hab-raacyo, Tilmaamo iyo Hageyaal si hab-sami leh loogu hirgeliyo Sharcigan.

## Qodobka 44aad: Baabi'in

Sharcigani wuxuu baabi'inayaa Xeer kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin.

## Qodobka 45aad: Dhaqangal

Sharcigan wuxuu dhaqan-gelayaa marka baarlamaanka federaalka ah uu ansixiyo, madaxweynuahuna uu saxiixo isla markaasna lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda JFS.